

## **JAWAAB KU:X.UGAAS:SOOMALAY MURAN MAGAC AMA XORIYAD MID DOORO:**

WAA SAGAARO BIYAH A WAA CABTAA IYO MA CABTO LA ISKU LAAYEY!  
QORE: ABDURAHMAN HUSSEIN MOHAMED, AMIIRDALDOON, DENMARK 16.11.11

Iyadoon si kooban uga jawaabayo so'aal uu qoraagu ku khatimay maqaalkiisa: <http://shilaabonews.com/warka/?id=28> (magaca Ogadeen miyaa hortaagan halganka) isagoo akhristaha wediiyey sida uu u arko in magac lagu shaqeyyo uu caqabad noqdo inta lagu jiro gobanimo doonka, siiba gobolka Waqooyi Soomaali Galbeed, waa siday anigaa ii tahaye, aduunkuse u yaqaan OGADENYA, oo sida la wada ogyahay shido lagala kulmay magaca ah Ogaden, nasiib darrayd ahayd iyo xilkasnimo darro in la is barbar dhigo magac iyo xorriyadda Ummadda Soomaalida oo dhan oo ku xirnayd xorriyadda Soomaali Galbeed sida hadaba ay taasi ugu caddahay qof walba siqiir iyo kabiir.

Jawaabta oo faahfaahsanna iyo sida ay hadda dantu tahay in loo shaqeyana waxaad ka eegtaa maqaaladan ay linkyadoodu soo socdaan:

- 1- Ummad & Gobol Dulman: XEERARKA OAUDA IYO Unka WAA QAADE IYO QARSHE: <http://shilaabonews.com/warka/?id=26>, <http://ceegaag.com/2011/Nov%202011/UMMADDA%20SOOMAALIDA.pdf>,
- 2- THE BETRAYAL OF THE SOMALI NATION AND THE HORN: <http://shilaabonews.com/eng/?id=5>.

Hadda oo ay muuqato inaan Soomaalidu helayn xorriyad ah tafaariiq oo reerba meel uu ula sii jeesto waxaa khasab ku ah Soomaaida inay wada jir marka hore ku doonto Gobolka Geeska Afrika oo loo marayo inuu ka koobnaado saamiyo/dalal xalaal ah oo taako kasta la mulki siiyey dadkii degenaa ka hor isticmaarkii qaybsaday qaarada.

Aniga waxay ila tahay inuu murankii magaca halganku geystey dhib ka badan inta dad badani ay qiyaasayaan. Waayo waxaan la kulmay rag waaweyn oo u hadlayey si aad looga naxo oo leh “intuu reer na adoonsan lahaa, gumeysigu ha nawada adoonsado”.

Si kale marka loo eego, reerka maskaxda ay ku hayeen dad kaasi waajib culus inay iska saaraan ayey ahayd walina tahay, waana muftaax, inay dadka ka daweeyaan cudurkaas iyo cuqdaddaas xoogaasi leh ee khatartaa. Sidoo kale, dhinacyada ay khusayso ee guud ahaanba Soomaaida waxaa haboon inay labada dhinacba fikir kooda wax ka qabtaan oo aan intaasi ka badan loo dulleysnaan wax magac ku siman.

Waa lagama maarmaan in la bilaabo ururinta dadka aanu ka dhammaan hanka ah inay Soomaali isu timaado si looga wada baxo dulliga laga siman yahay dhamaan dadka ku hadla Af Soomaaliga. Haddaan kolba darisku kala maarminna walaalaha Geeska Afrika ee uu isticmaarku isku diray waxaa u roon inay dantooda gartaan oo ay iska xalliyaa mu'aamarradda uu isticmaarku u maleegey markaana ay bilaabaan inay walaalnimo ugu wada noolaadaan gobolkooda oo ku filan kana badan iyadoo loo siman yahay xorriyadda iyo caddaalada. Xabad in badda Soomaalida lagu gaaro sidaas ayaa ka dhib yar kana hubaalsan inay muwaadiniinta gobolku wada shaqaystaan, wada ganacsadaan, wada beero fashaan, wada kalluumaystaan oo sharaf ku wada kobcaan.

Amiirdaloon: amiirdaljire@hotmail.com